# Adeegga la yareeyay ee Metrorail si aad u sii wado

MUUQAALKA: Wararka Kooban ee Metro - Oktoobar 22, 2021

Metro waxay sii wadaa inay ka shaqayso soo gabo-gabaynta qorshayaasha ayadoo kaashanaysa saraakiisha badqabka si adeegga rakaabka loogu soo cesho 7000 oo gaadiidka tareenka ah si buuxdana ay usoo celiso nidaamkeeda tareenka. Sidaas awgeed, adeegga Metrorail ayaa kusii shaqayn doona heerarka adeegga ee hadda hoos loo dhigay ilaa ugu yaraan Oktoobar 31 deeda, 2021.

Inta lagu jiro waqtigaan, tareennada ayaa wadi doona adeegga aasaasiga ah 15-20 daqiiqo kasta Marinka Cas iyo 30-40 daqiiqo kasta dhammaan marinnada kale. Adeegga Marinka Qalinka ah ayaa kasii shaqayn doona inta u dhexaysa Wiehle-Reston East iyo Federal Center SW keliya. Macaamiisha waxaa lagu boorinayaa, markay suurtaagal tahay, inay adeegsadaan adeegga Metrobus oo ah badalka adeegyada aan shaqaynayn.

“Waxaan fahmaynaa inay ahayd asbuuc ku adag dadka ku tiirsan gaadiidka Metro ee ka shaqeeya gobalka, waxaana qiraynaa caqabadaha ay waajahayaan macaamiisheenu,” ayuu yiri Maareeyaha Guud ee Metro Mudane Paul J. Wiedefeld. “Waxaan ka shaqaynaynaa sida ugu dhakhsaha iyo badqabka badan ee macquulka ah inaan kormeerno taayirada midkasta oo kamid ah tareennada taxanayaasha 7000 waana muhiim inaan arrintaan saxno.”

Si aan gacan uga gaysano yaraynta cariiriga tareennada ee ka dhashay inay shaqada ka maqan yihiin dhammaan 748 gaari ka jira raxanta taxanayaasha 7000, Metro waxay samaynaysaa dadaal kasta si ay tareenno dheeraad ah u geliso adeegga, ayna ku jiraan qaar kamid ah naqshadii 2000 ee ku jira kaydka, iyo naqshadaha 6000 ee ay ku socoto dayactirka.

Metro waxay kala shaqaynaysaa Gudigga Badqabka ee Washington Metrorail iyo warshadaha gaariyaasha taxanaha 7000, Kawasaki, si loo dhamaystiro hanaanka kormeerka. Ilaa hadda, dhammaan marka laga reebo ku dhawaad 100 gaari oo kamid ah raxanta 7000 ayaa kormeer lagu sameeyay.

Si aan qaab amaan ah adeegga ugu celino gaadiidka taxanaha 7000, Metro waxay abuuraysaa qorsheyaal cusub iyo hanaanno lagu sameeyo kormeero, kuwaasoo ay ku jiraan qiimaynta xawaaraha kormeerka ayadoo la adeegsanaayo xogta cusub si loo go'aansho inta jeer ee la hubinaayo qaabka taayirada. Gaariyaasha taxanaha 7000 ayaa la kormeeray ayadoo la raacaayo heerka ganacsiga ee 90 maalmood ba mar.

Marka gaariyaasha tareenku ah ay diyaar u noqdaan inay ku laabtaan adeegga, gaadiid dheeraad ah ayaa u baahan in xal loo helo si loo hubiyo in gaariyaasha tareenka ah iyo

qalab loo diyaarsho dhammaan nidaamka. Tani waxay u baahan tahay in dib loo nidaamsho gaariyaasha tareenka ah si loo waafajiyo cabirada tareenka ee Metro lana tixgeliyo jadwallada cusub ee kormeerka oo qayb ka ah adeegga rakaabka marinka.

Sabab la xariirta hoos u dhigida adeegga, macaamiisha ayaa waajihi kara gaariyaal, basas iyo astaannada oo cariiri noqda. Metro ayaa kor u qaaday sifaynta hawada ee gaariyaasha tareenka ah, basaska, astaannada iyo xarumaha kale ee Metro. Gaariyaasha Metrorail ayaa hawada dib u sifeeya ku dhawaad sadexdii daqiiqaba mar. Xasuusin ahaan gafuur xirka ayaa wali qasab ah dhammaan nidaamka.

Macaamiisha waxaa lagu boorinayaa inay adeegsadaan aaladaha qorshaynta safarka ee Metro si ay u helaan xogta jadwalka. Aalada Qorshaynta Safarka ee Metro ayaa lasoo galiyaa xogtii ugu danbaysay ee jadwalka halka Khariirada Layfka ah ee Metro ay xog joogto ah ka bixiso meesha tareennadu marayaan dhammaan shirkada taasoo u sahlaysa macaamiisha inay diyaar garoow fiican sameeyaan.

Metro wali ma hayso qiyaasta marka adeegga buuxa dib loo bilaabi doono. Xogta adeegyada iyo wararkii ugu danbeeyay ayaa macaamiisha loogu soo gudbin doonaa Fariimaha qoraalka ama iimeelka ee MetroAlerts, barta Twitter @MetrorailInfo iyo bogga Xaalada iyo Digniinaha ood ka helayso wmata.com.

Xog dheeraad ah ayaa sidoo kale laga heli karaa qaybta Xogtii ugu danbaysay ee Adeegga Metrorail iyo Baaritaanka Caqabadaha.